CITY of BOSTON

Economic Opportunity and Inclusion

# BARNAAMIJKA GANACSIGA DHAXALKA

*"Ganacsiga Dhaxalka" waxa lagu qeexaa ganacsiyo muddo dheer soo jiray, oo madaxbannaan kuwaasi oo bulshada wax wayn taray. Ganacsiyadani waa tiirar dhaqameed waxayna qayb gaar ah ka yihiin aqoonsiga taariikheed ee Boston.*

Waxaanu rumaysannahay in iftiiminta ganacsiyadani ay gacan ka gaysan karaan ka dhigista xaafadaheena meel la xiiseeyo in la soo booqdo. Waxaanu rabnaa inaanu kordhino kharash-garaynta iyo dadka lugaynaya degmooyinka ganacsi ee deegaanka. Iyadoo muuqashada la kordhinayo, yoolkeenu waxa weeye hubinta in Ganacsiyadan Dhaxalka ay:

1. ka fogaadaan barabixin
2. kordhiyaan saamayntooda
3. ku sii hayaan shaqaalaha deegaanka shaqada, oo
4. xoojiyaan kala-duwanaanshaha dhaqameed ee Magaalada Boston

Ganacsiyada Dhaxalku waxa waajib ah inay ka shaqaynayeen ugu yaraan 10 sano gudaha magaaalada Boston. Guulaystayaashu waxa waajib ah inay ballanqaadaan inay ka sii shaqaynayaan magaalada markay guulaystaan.